

Xeerka Wasiirka Isgaarsinta iyo Gaadiidka Dawladda 1 Jannaayo 1971, lamba. 15.

Dhismaha Qaybta Gaadiidka rayidka.

WASIIRKA DAWLADDA

Marka uu arkay Warqadda Koowaad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969;

Marka uu arkay Baaqa Golaha Sare Kacaanka ee ku taariikhaysan 21 Oktoobar 1969, iyadoo isla Golahaasu uu la wareegay awoodda Sharci Dejinta, Garsoorka iyo Fulinta Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya;

Marka uu arkay qod. 47 iyo 62 Cutubka II ee Dekereetada Barlamaanka 1962, lamba. 4 ee Xeerka Waddooyinka Soomaaliya;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in la sameeyo Guddi Farsamo oo u xilsaaran, Cillad Bixinta iyo dib u eegista sanadle oo joogta ah gawaarida iyo u qalmidda imtixaanka wadidda gawaarida Gobolka Banaadir;

WUXUU DEKERETO KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Waxaa laga dhisay Wasaradda Isgaarsiinta iyo Gaadiidka dhexdeeda – Qaybta Hawlaha Madaniga – Guddi Farsamo ee Cillad-bixinta iyo dib u-eegista joogta ah sameeya gawaarida iyo u qalmidda imitixaanka wadidda gawaarida Gobolka Banaadir.

Qod. 2

Guddigu wuxuu ka koobanyahay:

- 1) Maxamed Axmed Yuusuf (permesso) Madaxa Hawlaha Gaadiidka Rayidka ah – Guddoomiye;
- 2) L. Xiddigle Baddal Xersi Taliye Ku-xigeenka Ciidanka Waddooyinka – Xubin;
- 3) Maxamedv Faarax Kormeere Saddexaad Madaxa Ciidanka Boliiska Dab Damiska;
- 4) Xuseen Aadan Maxamed Sarkaalka Xaafiiska PRA – Xoghaye;
- 5) Aadan Afrax laba Alifle Gaadiidka Boliiska Waddooyinka.

Qod. 3

Guddigu wuxuu u xilsaaran yahay:

- a) Baarista cillad-bixinta hagaagsanaanta iyo badbaadada baabuurta yar-yar; saxnaanta dokumentiyada lagu soo gelinayo Dalka Soomaaliya iyo bixinta dhammaan wixii xuquuq iyo xog ku waajibay;
- b) Imtixaanka u qalmidda baabuur wadidda, baarista aqoonta xeerarka Socodka Waddooyinka iyo habsami shaqaynta aaladaha iyo xubnaha gaariga, sidoo hubinta kartida loo leeyahay KAXAYNTA qofka u sharraxan gaari wadidda.
- c) Dib u-eegista Guud sanadlaha dhammaan gawaarida la wato si loo hubiyo haddii ay jiraan xaalado ammaan ee gaadiidka socda iyo kuwooda fadhiya.

Qod. 4

Go'aanka Guddiga wuxuu ansax noqonayaa marka ay joogaan aqlabiyadda xubnaha, haddii codkoodi isla ekaado waxaa ansax noqonaya codka guddoomiyaha Guddiga meesha uu raaco.

Qod. 5

Xarunta Guddiga waa Muqdisho, Xaafiiska Hawlaha Gaadiidka Rayidka.

Qod. 6

Marka laga soo tago ganaaxyada ku xusan Xeerka Waddooyinka, waxa khuseeya, dhammaan gawaarida lagu soo xusay qod. 1, oo aan soo marin guddiga dib u-eegista, ee ku xusan Dekereetadaan, ma socon karaan marka ay ka dhacdo muddada ku asteeysan qod. 7 ee isla Dekereetada iyada, waxaana loo aqoonsanayaa gawaari aan ku habboonayn in ay socodan.

Qod. 7

Guddoomiyaha Guddiga Tijaabada iyo imtixaanka gaadiid wadidda, kadib marka ay soo gabagabowdo hawshooda farsamada, waa in uu u soo gudbiyaa Qaybta Diiwaangelinta Guud ee gawaarida dokumentiyada la xariira Xaafiiska (P.R.A.), si ay u gutaan hawlahooda Maamul ee shaqadooda ah kadibna ay bixiyaan waraaqaha milkiyadda iyo ruqsadda in ay gaadiid wadi karaan.

Qod. 8

Dekereetadaan waxay dhaqangalaysaa 1da Janaayo 1971, waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga iyadoo lagu biirinayo Uruunta Dekeretooyinka Jamhuuriyadda Demoqataadoga ee Soomaaliya. Cidkastana waxaa ku waajiba in ay dhowrto una aqoonsato ka Xeer Dawladeed ahaan.

Muqdisho, 1da Janaayo 1971.

Wasiirka Dawladda

Dr. Maxamed Warsame